



Vulvamottagning

Angeredes närsjukhus

Rug qaabilaad oo takhasus gaara u leh
cudurrada dumarka.



Vulvamottagning Angered

Vulvamottagning Angered waa rug qaabilaad oo takhasus gaara u leh cudurrada dumarka oo loogu talagalay adigaaga:

- Muddo dheer xanuun ka dareemaysay xubinta taranka afkeeda, marka aad galmo sameyneysana ay isla meeshu ku xanuunto.
- Qaba dhibaato uu gudniinku kuu keenay.

Waxaa meesheenna ka shaqeeya taqtar ku takhasusay cudurrada dumarka, umuliso, lataliye arrimo bulsho, cilmi-nafsiyahan, jimcisiyahan iyo kaaliye kalkaaliso caafimaad.

Labo takhasus

Xanuun

Xanuun waxaa loogu talagalay bukaannada muddada dheer xanuun ka dareemayay xubinta taranka afkeeda ama dusha sare xilliga galmada (vulvodynia ama vaginismus).

Si loo awoodo in la joojiyo dhibaataada muddada dheer socotay ee xanuunka ah, waxaa badanaa loo baahdaa daweyn waqti dheer socota iyo iskaashi dhex mara dhowr xirfadood oo kala duduwan. Daweynta waxaa la waafajinayaa qof walba baahideeda gaarka ah. Rugta qaabilaadda wad nagu soo booqan kartaa, si digital ahna waa naloogu soo booqan karaa labadaba. Waxaan sidoo kale koox-koox u bixinnaa vulvaskola.

Gudniinka/fircooniga

Gudniinka/fircooniga wuxuu khuseeyaa bukaannada la guday mid sunni ah/mid fircooni ah.

Dhibaatooyinka uu keeno gudniinka sunniga/fircoonigu waxay u ekaan karaan siyaabo kala duwan. Tusaale waxaa dhibaatooyinka u ah xasuus adag, bocoolo, dhibaato xagga kaadida ah iyo xanuun la xiriira caadada iyo galmada. Waxaan kugu caawin karnaa adigaaga gudniinka loo geystay daweyn la xiriirta dhibaataada, qalliin, tala bixin iyo wadahal. Waxaan leennahay khibrad dheer oo waxaan la kulannay dad badan oo lagu sameeyay gudniinka/fircooniga.



Ku saabsan gudniinka/fircooniga

Marka lays gudayo waxaa la gooyaa qeybo ka mid ah xagga sare ee xubinta taranka, waana/ama waa la isku tolaa.

Marka uu gudniinku yahay mid fircooni ah, waxaan ku talinnaa in qalliin yar lugu sameeyo - qalliin furitaan ah.

Qalliinka furitaanku wuxuu kuu fududeyn karaa kaadida haddii ay wakhti dheer kugu qaadato inaad kaadiso, haddii aad caadada aad ugu xanuunsato ama ay kugu adagtahay inuu dhiigga caadadu kaa soo dhammaado, haddii aad xanuunsato marka aad galmo sameyneyso, ama haddii aad uur leedahay oo aad cunug dhali doonto.

Mar walba waa lugu kabaabyeynaya marka qalliin laguugu sameynayo si aadan u dareemin xanuun. Vulvamottagningen, waxaanu kuu taageeri karnaa, kuuna caawin karnaa ku caawin karnaa si waafaqsan baahidaada iyo rabitaankaaga.

Ku saabsan xanuunka xubinta taranka afkeeda

Xanuunka xubinta taranka afkeeda waxaa loo dareemi karaa siyaabo kala duwan. Waxaa la dareemi karaa sida gubasho ama xanaf, ama waxay ku xanuuni kartaa oo keliya marka aad rabto inaad siilka wax geliso.

Wuxuu xanuunku ku xirnaan karaa in tusaale ahaan dareemayaasha xanuunka ee xubinta taranka afkeedu ay si dheeri ah xasaasi u yihiin, ama aad si aan caadi ahayn u adkeysay sagxadda miskaha. Wuxuu xanuunku noqon karaa mid muuqda xaalado kala duwan, tusaale ahaan marka la sameynayo galmo leysku dhegayo, marka la isticmaalayo tambooni, marka la sameynayo dhaqdhaqaaqyo sida fuulista fardaha/baaskiil wadidda, ama marka baaritaan lagu sameynayo xubinta taranka dumarka.

Si loo ogaado inaysan haweeneydu qabin vulvodynia ama vaginismus waxaa loo baahan-yahay in marka hore meesha laga saaro sababaha kale ee xanuunka keeni kara.



Ma rabtaa caawimaad?

Adeegga caafimaadka dugsiyada, rugta qaabilaadda dhallinyarada, rugta qaabilaadda umulisooyinka ama rugta caafimaadka ayaa kaa caawin kara in ay annaga noo soo kaa gudbiyaan. Sidoo kale adigu waa isu qori kartaa is-gudbin. Foomka isasoo gudbinta waxaad ka heleysaa barta intarneetka ee Angereds narsjukhus:

- www.angeredsnarsjukhus.se/egenremiss

Had iyo jeer ku soo dhawoow inaad nala soo xiriirto haddii aad su'aalo qabto ama aad rabto inaad hadasho.



Is-gudbin

Xiriir

Angereds narsjukhus, Halmtorget 1, Angered

Telefoon: 031 – 332 69 02

- www.angeredsnarsjukhus.se/vulvamottagning

1177

Waxaad sidoo kale nagala soo xiriiri kartaa 1177.se



1177.se

